


# XILLIGI DABKA KEYNTU WAA SOO DHAWAADAY

HADDA QOYSKAAGA U DIYAARI



**&** BADBAADADA  
DABKA KEYNTA



# WAXA NAGA GO'AAN BADBAADADAADA

Sanadadihi ugu dambeeyay California waxa soo maray dhowr ka mid ah dababka keymaha ee ugu khasaaraha badnaa abid. SDG&E® waxay samaynaysaa dadaal kasta oo gacan kaga gaysanaya ka ilaalinta mandaqadda wixii halis ah ee la xiriira dabka kaynta. Mudnaantayada koowaad waa badbaadada macaamiishayada, shaqaalaha iyo bulshooyinka, taasi oo ah sababta aanu u sii wadno horumarinta iyo xoojinta qalabyada iyo qaab-dhismeedyada jira.



WAX KA BADAN

100

kaameerado ayaa dabagal ku sameynaya cimilada iyo dabka.



WAX KA BADAN

220

xarumaha cimilada waxa laga helaa qoraalo sheegaya xawaaraha dabaysha, huurka iyo heerkulka.



26,000

biitayada korontada oo loox ah ayaa loo baddalay bir aan dabku karin.



455,000

geedo ayaa la baaray kadibna waa la jaray kuwaas oo u dhawaa xarkaha laydhka ee SDG&E.



33

Daaladaha daaronka ayaa fuliya kormeero dhanka hawada ah oo sanadka oo dhan lagu sameynayo xarkaha korontada iyo dhumaha naqaska.



6

helikabtar ayaa gacan ka gaysanaya badbaadada dabka iyo kormeeridda xarkaha korontada.



**Intaas uun kuma eka..** Haddii ay jiraan xaalado halistoodu sarrayso, waxaa dhici karta inaanu damino korontada si aanu u ilaalino badbaadadaada iyo ta bulshadaada. Tallaabadan waxaa **loo yaqaanaa u Daminta Qaabka Badbaadada ah Korontada Dadwaynaha (PSPS)**.. Horumarrada dheeraad ka ah ee badbaadada dabka keynta waxa loola jeedaa yareynta saamaynta macmiilka soo gaaraysa iyo gubashooyinka ka iman kara ee la xiriirta dabka keynta.

# WAA MAXAY U DAMINTA KORONTADA DADWEYNAHA QAAB BADBAADO LEH?

SDG&E waxay la socotaa xaaladaha dabka ee halistoodu sarrayso. Kuwase ka mid ah balse kuma koobna kuma koobna::



**DABEYLAHA  
XAWAARAHA  
SARE KU SOCDA**

(Kuwaasoo ay ku jiraan digniinaha Calanka Cas)



**HUURKA  
HEERKIISU  
HOOSEEYO**



**DHIR QALALAN**  
Tasoo loo adeegsan karo  
shidaal ahaan




**KHATARTA  
DABKA**  
ee ku aaddan  
kaabayaasha  
korontada



**U KUURGALLADA  
DHULKA KA SOCDA**



**HALISTA  
BADBAADADA  
DADWAYNAHA**



Haddii ay jiraan xaalado halistu sarrayso, waxa dhici karta inaanu damino korontada marka ugu dambaysa si aanu u ilaalino badbaadadaada iyo badbaadada bulshadaada.



Si aad wax badan uga ogaato u Daminta Dadweynaha Qaab Badbaado leh, booqo ciwaanka [sdge.com/wildfire-safety](https://sdge.com/wildfire-safety).



# SIDEE LOO GO'AAMINAYAA IN QAAB BADBAADO LEH LOO DAMIYO KORONTADA DADWEYNAHA?

## Hannaanka u Daminta Korontada Dadweynaha Qaab Badbaado leh

### Inta u dhaxaysa 7-10 maalmood kahor



Marka saadaashu sheegto suurtoqalnimada xaalado khatar badan inay yimaadaan, SDG&E waxay la socotaa halista dabka iyo saamaynaha iman kara.

### Inta u dhaxaysa 3-6 maalmood kahor



SDG&E sidaas darteed waxay qaadaa-dhigtaa saadaasha cimilada iyo suurtoqalnimada dabka duurku inuu bilaabmo.

### Inta u dhaxaysa 2 maalmood kahor



SDG&E waxay bilaabi doontaa wargelinta macaamiisha laga yaabo inay saamayso u Daminta Korontada Dadweynaha QAaab Badbaado leh, taasoo ay ku jiraan xarumaha muhiimka ah iyo macaamiisha qiime dhimista caafimaadka haysta, iyo sidoo kale hay'adaha dawladda ee heer Gobol, Degmo iyo Magaalo.

### 1 maalin kahor



SDG&E waxay halkeeda kasi wadi doontaaisla markaana inay la socoto xaaladaha cimilada, inay la xiriirto bulshooyinka saamaynta ay ku yeelatay oo ay la shaqayso gargaarayaasha safka hore iyo wakaaladaha qaabilsan badbaadada dadwaynaha.

### Maalinta daminta korontada



SDG&E waxay ku wargelisa bulshooyinka, wakaaladaha badbaadada ee dawladda iyo kuwa dadwaynaha, in korontadi la damiyeey.

### Korontada dib loosoo celiyey



Marka waxyeelada xaaladaha cimiladu ay meesha ka baxdo, SDG&E waxay bilaabi doontaa inay dib u soo celiso korontada. Shaqaalaha iyo qoraallada la xiriira cirku waxay kormeeri xarkaha korontada ee cirka mara si ay u hubiyaan inayna jirin waxyeelooyin kasoo gaaray dabaylaha xawaaraha sare ku socda kuwaasoo ay badbaado tahay inay hawlgalaan.

## Jadwalka Wargelinaha (markay suurtoqal tahay)



Haddii aanu filayno in korontadu maqnaan doonto wakhti dheeraad ah, waxaanu furi karnaa Xarumaha Qoraalada Bulshada iyo/ama Xarumaha Macluumaadka ee meelaha saamaynta ay ku yeelanayso.

# OGOW MEESHA LA AADO MARKA WAKHTIGA KORONTADU DANSAN TAHAY DHEERAADO

U Daminta Korontada Dadweynaha Qaab Badbaadado ah waxay socon kartaa ilaa xaaladaha halista dabku noqdaan qaar aan khatar lahayn.

Waxa dhici karta inaanu u furno wax ka mid ah Xarumaheena Macluumaadka Bulshada meelaha ay saamaynta ku yeelatay.

Xarumahani waa goobo ay aadi karaan dadka deegaanka ee ay saamaynta ku yeelato si ay u helaan alaabta isku diyaarinta, baraf, biyo, cuntooyin fudud, qalabka baddala korontada baabuurka, baatariyo soolar ku shaqeeyo oo yaryar iyo raadiyowyo, isla mar ahaantaana uga helaan macluumaad cusub oo ku saabsan daminta korontada.



Liiska dhammaystiran ee Xarumaha Macluumaadka Bulshada, oo ay ku jiraan magacyada iyo cinwaanada xarumaha, booqo ciwaanka [sdge.com/resource-centers](https://sdge.com/resource-centers).

# IS ILAALI – WAX SAMEE

Si wacan u feker. Badbaadadaada khatar ha galin. Tallaabooyin qaad hadda si aad iskugu diyaariso wixii xaalad deg-deg ah.



## Deji qorshe la xiriira xaaladda deg-degga ah

Isla garta meel qoysku ku kulmo, dariiqyo iyo gabbaadyo badbaado leh, iyo sidoo kale tallaabooyinka aad qaadi doontaan. Kala hadal isla mar ahaantaanaa qoyskaagaku tababar qarhsha, taassoo ay ku jiraan carruurtaadu.



## Diyaari sanduuqa xaaladda deg-degga

Waxyaalaha aasaasiga ah gacanta ku hayso. Hubi in sanduuqa ay ku jiraan waxyaalaha adiga iyo qoyskaaga u baahan tihiin, kuwaasoo ay ku jiraan waxyaabo ay u baahan yihiin xayawaanadaada rabbaayada ah, dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ah. Ku gur weel si ay suurtagal u noqoto in si fudud loo qaadan karo sida boorsooyinka dhabarka ama keesaska caagga ah. Fiiri liiska hubinta ee ku jira gudaha.



## Soo Dejiso barnaamijka PSPS, "Alerts by (Wargelinada) SDG&E"

Xog-ogaal u ahaw u Daminta Korontada Dadwaynaha Qaab Badbaado ah (PSPS) kahor, inta lagu jiro iyo kadib marka lagu baaqo dhacdooyinka. Booqo [sdge.com/pspsapp](https://sdge.com/pspsapp) si aad ula soo degto app-ka ama wax badan u ogaato.

Xaaladuhu siday rabaan ha noqdeene, dadaal kasta ayaanu samayn si aanu kuula soo xiriirno.

## Cusboonaysii macluumaadka ciwaanka xiriirka

Booqo ciwaanka [sdge.com/MyAccount](https://sdge.com/MyAccount). Guji "Manage Your Contact Info (Maaree Macluumaadkaaga Xiriirka)" kadibna cusboonaysii macluumaadkaaga xiriirka ciwaanka, sida cinwaanka iimeylka.



## Iska diiwaangeli wargelinaha daminta tamarta

Xogogaal ahaw, si markaa aanu kaaga caawin karno inaad badbaaddo. Hannaankan sidoo kale waxa loogu talagalay PSPS, ee looguma talo-gelin dabka keymaya oo kaliya. Bilaw adigoo hubinaya in macluumaadka ciwaanka xiriirku yihiin kuwii u dambeeyey. Booqo [sdge.com/notifications](https://sdge.com/notifications).



## Samee Sahankeena Adkaysiga oo hel tallaabooyin

Waxaanu diyaarinay su'aalo taxane ah oo kooban kuwaasoo wata talooyin cid kasta anfici kara oo loogu talagalay adiga iyo ehelkaaga. Markaad dhammayso xog-ururinta, waxaad dooran kartaa urur bulsho oo SDG&E ay ugu deeqi doonto \$20 iyadoo adiga ku matalaysa. Wax badan ka ogow [sdge.com/prepared](https://sdge.com/prepared).

# IS DIYAARI -- ABUUR BARXAD LA DIFAACI KARO

Hoos u dhig in gurigaagu la kulmo halista adigoo wax ka baddalaya dhirta ku hareeraysan si uu ugu adkaysto dabka keynta.

## AAGGA 1

Aagga ku dhaw gurigaaga waa inuu bannaan ku filan yeesho uuna ka koobnaado dhir gaagaaban oo dabka u adkaysata, sida doog, beero khudaar ah, ubaxyo ama dhir ay ku taliyeen dhir-xannaaneeyayaasha deegaankaagu.

## AAGGA 2

Dhir gaagaaban oo caawisa u adkaysiga dabka oo shidaalkuna ku yar yahay ayaa lagu talinayaa in laga beero aaggan. Kala hadal cid beerista dhirta ku xeel dheer dhirta ay tahay inay kuu noqoto barxad la difaaci karo.

## AAGGA 3

Ka hubi hay'adaha maamulka bii'adda kahor inta aadan waxba ka baddalin dhirta asalka ah taasoo ay ku jiri karaan noocyo iyo deegaano dabargo'aya.

**30-50 ft.**


Degmada San Diego waxay kaaga baahan tahay in 50 fuudh dhirta laga jaro Aagga 1.

**100 ft.**

Gobolka California waxaa lagaaga baahan yahay inaad 100 fuudh oo ah barxad la difaaci karo ka sameyso agagaarka goobtaada.

**Ka baxsan 100 ft.**

Dhirta aan la arbushin



# DEEQUHU WAXAY GACAN KA GAYSTAAN DHISIDDA BADBAADADA BULSHADA

---

Muddo ka badan toban sano, mashruuca bixinta sadaqada ee Safe San Diego ee SDG&E wuxuu bixiyey deeqo uu ku taageerayo gargaarayaasha safka hore, isku diyaarinta xaaladaha deg-degga ah, barxad la dugsan karo, iyo waxbarashada la xiriirta badbaadada dabka keynta isagoo u maraya iskaashiyada bulshada ee Laanqaynta Cas ee Maraykanka, 211 San Diego, 211 Orange County, the San Diego Regional Fire Foundation, the San Diego Fire Rescue Foundation, the Burn Institute, the Inter Tribal Long Term Recovery Foundation, Community Emergency Response Teams (CERTs), Tribal Emergency Response Teams, Fire Safe Councils, iyo ururo kale oon khayri ah. Faah-faahin dheeraad ah ka raadso ciwaanka [sdge.com/safe](https://sdge.com/safe).



**& BADBAADADA  
DABKA KEYNTA**



P.O. Box 129831 | San Diego, CA 92112-9831 | 800-411-7343

©2021 San Diego Gas & Electric Company. Astaanta ganacsiga waa hantida u gaarka ah cidda iska leh. Dhammaan xuquuqdu waa dhawrsan tahay. S2110025 1021